# Deggenaansho Joogto ah – Midowga Yurub

Warqad Macluumaad

Xaaladda taariikhdu tahay: 01.01.2026

## Waa maxay "Deggenaansho Joogto ah – Midowga Yurub"?

"Deggenaansho Joogto ah – Midowga Yurub" waa oggolaansho qofka u oggolaanaya inuu si joogto ah ugu noolaado oo uu ka shaqeeysto dalka Austria. Ma leeyahay waqti dhamaad ah? (ma aha mid ku meel gaar ah), laakiin waa in la cusboonaysiiyaa 5-tii sano mar (kaarka oo keliya).

Qofka leh oggolaanshahan waa inuu si dhab ah ugu nool yahay Austria. Ma aha muhiim xaaladda dalkii uu ka yimid sida isbeddeshay. Oggolaanshahan waxaa la burin karaa oo keliya haddii ay jiraan sababo culus.

Halkan waxaa lagu sharxayaa sida aad uga beddeli karto **oggolaanshaha joogitaanka ee ku saleysan sharciga magangalyada** (magangelyo, ilaalinta ku meel gaarka ah, ama oggolaanshaha joogitaanka (plus) una **beddeli karto deggenaansho joogto ah ee Midowga Yurub**.

Faallo: Waxaa sidoo kale jira fursado kale oo lagu beddeli karo noocyo kale oo oggolaansho joogitaan ah una gudbi karo deggenaanshaha joogtada ah ee Midowga Yurub, balse halkan si faahfaahsan looguma faahfahin.

---

## Yaa heli kara "Deggenaansho Joogto ah – Midowga Yurub"?

Qofku wuu heli karaa haddii uu

- ugu yaraan 5 sano si sharci ah uga noolaa Austria
- iyo uu buuxiyo shuruudo kale (hoos ku qoran).

# Waa maxay waqtigaas 5-ta sano ee la tirinayo?

Waxay ku xiran tahay nooca oggolaanshaha uu qofku haystay:

- Qofka haysta magangelyo ama ilaalinta ku meel gaarka ah.
  - Waqtiga lagu jiray codsiga magangelyada (inta la sugayay go'aanka) waxaa lagu tirin karaa kala bar.
  - Haddii codsiga magangelyada uu socday in ka badan 18 bilood, waqtigaas oo dhan waa la tirinayaa.
- Qofka hore u haystay oggolaanshaha joogitaanka (plus): ○ Waqtiga codsiga magangelyada lama tirinayo.

⚠️ Waa muhiim in khabiir uu eego kiiska si loo hubiyo inta bilood ee la tirinayo. Waxaa habboon **in la raadsado talo ka hor codsiga**.

---

# Shuruudaha la buuxinayo

Si loo helo oggolaanshaha "Deggenaansho Joogto ah – Midowga Yurub", waa in dhammaan shuruudahan la buuxiyaa:

### ⏱ 1. Ugu yaraan 5 sano oo deggenaansho sharci ah Austria gudaheeda

→ Fadlan eeg qaybta kore ee cinwaankeeda yahay „Waqtiyada loo tixgeliyo 5-ta sano waa kuwee?

---

### 💰 2. Dhaqaale ku filan

- Qofku waa inuu leeyahay dakhli ku filan, si uusan ugu tiirsanaan **caawin** dawladeed.
- Heerka dakhliga ugu yar **ee** loo baahan yahay waxa uu ku xiran yahay **heerarka magdhawga** (ASVG).

📌 **Sannadka 2026 waxaa lagu dabaqayaa heerarka soo socda (bishiiba, saafiga ah):**

- **Qof kali ah: 1.308,39 euro bishii**
- **Lammaane: 2.064,12 euro bishii**
- **Ilmo kasta: 201,88 euro dheeraad ah**

Lacagtaas waa **inay hartaa** kadib marka laga bixiyo kirada, caymiska iyo kharashyada kale. Halkaas waxa laga dhimi karaa waxa loogu yeero "Qiimaha Saldhigga Bilaashka ah" (386,43 Yuuro sanadkii 2026) oo ka mid ah kharashyadan.

Caawinta bulshada (Mindestsicherung ama Sozialhilfe) looma tixgeliyo dakhli.

Si aad u hesho macluumaad faahfaahsan iyo tusaalooyin xisabeed oo wax ku ool ah,

Waxxan ku talinaynaa buugga macluumaadka ee BMI ee ku saabsan xisaabinta masruufka ee Sharciga Deggenaanshaha iyo Joogitaanka 2026 inaa akhriso: Informationsbroschüre des BMI über die Unterhaltsberechnung im Niederlassungs- und Aufenthaltsgesetz 2026

⚠️ Muhiim: Waxa loo tixgeliyo dakhliga iyo kharashyada laga jaro dakhliga waa in xaald kasta si gaar ah loo baaro. Waxaana habboon in la helo **talo ka hor inta aan la gudbin codsiga.**

---

## 🏠 3. Guri ama meel deggan oo sharci ah

Qofka waa inuu leeyahay **guri ama meel la dego** oo **waafaqsan heerka nolosha ee Austria** (leh koronto, biyo, musqul, kuleyliye, iwm). Waxaa loo baahan yahay heshiis kiro ama dukumenti muujinaya xuquuqda deggenaanshaha.

---

## 📇 4. Caymis caafimaad

Qofka waa inuu **ku jiraa caymis caafimaad** (tusaale: shaqo, ama caymis qoys).

---

## 🔊 5. Luuqadda Jarmalka – Qaybta 2 ee Heeshiiska Isdhexgalka – Midowga Yurub

Si aad u heesho ogolaanshaha deggenaanshaha joogto ah Midowga Yurub, waa in la buuxiyaa Qaybta 2 ee Heeshiiska Isdhexgalka.

Taasi macnaheedu waa:

- **Inaad leedahay aqoon afka Jarmalka ah oo gaarsiisan heerka B1 ah – imtixaanka isdhexgalka ee ÖIF**
- **AMA**: inaad inaa si guul leh u dhammaysay dugsiga oo aad ku baratay af Jarmal, ama aad muddo dheer iskuul u tagaysay oo aad si wanaagsan ugu dhamaysay maadada “Jarmalka”
- **AMA**: inaad dhammaysay xirfad, tababar ama jaamacad oo lagu **dhiganayo** af Jarmal (tusaale: barasho shaqo, ama jaamacad)

📌 Noocyada shahaadooyinka iskuulka iyo muddada waxbarasho ee la aqbalayo waa in lagu caddeeya si gaar ah oo kiiskaaga ah adigoo la tashanaya hay’ad talo bixin ah.

⚠️ Muhiim: Kaliya Qaybta 1 (Jarmal A2) kuma filna. Waxaa Sharciga uusan qabaneyn dadka aan si joogto ah u dhammayn karin Qaybta 2 sababo caafimad awgeed. Si taas loo caddeeyo,

waxa loo baahan yahay warbixin caafimad rasmi ah oo uu bixiyay dhaktar dawladeed. Arrintan sido kale waa in si buuxda lagala hadlaa xarunta talo bixinta.

### 6. Dembiyo culus aanan laheyn

Qofka waa inuusan laheyn dembi culus khatarna gelinayn ammaanka dadweynaha.

## Halkee laga dalbanayaa?

Codsiga waa in lagu gudbiyaa Bezirkshauptmannschaft ama Magistrat ee meesha aad ku nooshahay – iyadoo ku xiran meesha qofku deggen yahay.

Waa in codsiga la geeyo si shakhsi ah. Waxaa la bixiyaa waqti ballan ah, kadibna maamulka ayaa hubinaya dhammaan dukumentiyada iyo caddaymaha.

Liiska dukumentiyada loo bahan yahay waxaa laga heli karaa bogga maamulka ama xarunta talo bixinta:

Unterlagen

⚠️ Muhiim: Guud ahaan, waxaa loo bahan yahay Shahaadada dhalashada iyo Baasabor sax ah. Haddii aan la heli karin, waxaa lagu dalban karaa Heilungsantrag (qodobka §19 farqadda 8 NAG).

## Maxay kuu keenaysaa "Deggenaanshaha joogto ah – Midowga Yurub"?

Marka qofku helo deggenaanshaha joogtada ah Midowga Yurub, wuxuu xaq u leeyahay in uu:

- si joogto ah uga noolaado oo uga shaqeeyo Austria
- yeesho xuquuq buuxda oo uu suuqa shaqada **ah**
- **Inuu** xaalado gaar **ah u** wareegi karo waddan kale oo ka tirsan Midowga Yurub
- helo xaalad deggenaansho oo deggan(aan ku xirnayn heeshis shaqo)

⚠️ Muhiim: Oggolaanshahan "Deggenaanshaha Joogto - Midowga Yurub" ma siinayo qofka xaq uu si toos ah uga noolaado ama uga shaqeeyo waddan kale oo ka tirsan Midowga Yurub muddo dheer. Si taas loo sameeyo, waxaa loo baahan yahay nidaam codsi gaar ah oo waddankaas kale ah.

# Xaggee laga heli karaa caawimaad?

Waxaa jira xafiisyo iyo ururo talo-bixin ah oo kaa caawin kara inaad ogaato haddii aad u qalanto oggolaanshahan iyo sida loo buuxiyo codsiga.

Liiska goobaha talo bixinta waxaa laga heli karaa halkan:

Beratungsstellen